

## **DOWLADDA SOOMAALIYA**

**XEER maamul 30 kii oktoobar, 1959. n. 152 rep.**

**Samaynta Golaha Sare ee Dugsiyada.**

Wasaaradda Waxbarashada Wasiirka

Marki uu arkay sharciga 7 maajo 1956, n. 1: "Curinta Dowlad Soomaliyeed";

Marki uu arkay wareegtada 18 maajo 1956, n. 78 kuna saabsan "Nadaaminta Dowladda Soomaaliya";

Marki uu arkay wareegtada 24ka Juun 1959, n. 43 oo wax ka badaleysa qodobka. 1 ee Go'aanka Sharci dejinta n. 18 maajo 1956, n. 78;

Iyada oo la tixgelinayo baahida loo qabo in la darso oo la isku dubbarido qorshayaasha kor u qaadidda iyo baahinta waxbarashada guud ee degaanka;

Iyada oo la arkay inay ku habboon tahay ujeeddadan in la asaaso guddi joogto ah oo loogu yeero in ay qayb ka noqdaan saraakiisha hawlahoodu la xiriiraan ururada iyo dhibaatooyinka dudsiyada, iyo sidoo kale wakiillo ka socda fasalka labaad ee Sare iyo dadka ku nool Soomaaliya;

**WUXUU XEEREYAY:**

### **Qod. 1**

Waxa la asaasay Golaha Sare ee dugsiyada oo leh dabiicad joogto ah xaruntooduna ku taal magaalada Muqdisho oo mas'uulna ka ah daraaseynta iyo talo siin ku saabsan maamulka dugsiyada degaanka iyo dhibaatooyinka dugsiyada guud ahaan.

### **Qod. 2**

Golaha Sare ee Dugsiyada waxa uu ka kooban yahay xubnaha joogtada ah ee soo socda, oo loogu yeeray inay ku biiraan muhimadda xafiisyadooda;

- Wasiirka Waxbarashada;
- Xoghayaha Xagga waxbarashada;
- Madax waaxeed;
- 1 Sarkaal Arimaha Gudaha ka socda;
- 1 Sarkaal Xafiiska Daraasaadka iyo Tirakoobka ka socda;
- Wakiilka xagga Diinta Muqdishu;
- Madaxa Qaaliyaasha;
- Dhakhtarka Dugsiyada.

### **Qod. 3**

Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo kale oo laga dooran doono tiro 7 ah oo ka socda maamulka iyo macallimiinta shaqaalaha Dugsiyada heer kasta oo ay yihiin iyo darajo kasta oo Soomaali ah iyo tiro 2 ah wakiillo ka socda dadka deegaanka.

Magacaabista waxaa la sameynaya sanad walba iyadoo la raacayo amarka Wasiirka Waxbarashada dadweynaha.

#### **Qod. 4**

Waxaa loogu yeeri karaa inuu ka qeyb galo shirarka Golaha Injineer Madani ah markasta oo ay jiraan arrimo la xiriira dhismaha Dugsiyada iyo farsamada gacanta.

#### **Qod. 5**

Marka lagu daro shaqooyinka ku xusan qodobka hore 1 ee la xiriira dhibaatooyinka noolaha ee dugsiga, Goluhu wuxuu ku fulin doonaa baaritaankiisa dhammaan arrimaha la xiriira howlaha dugsiga, oo loo gudbi doono marba marka ka dambaysa Wasiirka Waxbarashada dadweynaha.

#### **Qod. 6**

Goluhu waxa ay shaqa bilaabayaan 1da diseembar 1959.

Muqdisho, 30ka oktoobar 1959.

Wasiirka

**Maxamed Yuusuf Aadan**

Arkay diiwaan gelinta n. 19. Warqad n. 125.

Muqdisho, n. 19 jannaayo 1960.

Garssooraha xisaabaadka: **Spadaro**

---